



in Soomaali

Om Junis på somaliska



**Junis waa bay'ad xasilloon oo aynu
si wada jir ah madadaalo ku qabno**



Junis – Waa carruurta darteed

Junis waxay aaminsantahay in carruurta ahaadaan carruur. Waxanu rabnaa in aannu siinno wakhti firaaqo oo macno leh oo ciyaar, qosol iyo dhiirrigelin iyo xalladdu ay yihiin qaybaha uu ka koobanyahy.

Junis dhexdeeda, carruurta waa ay ku kori oo wax ku hindisi doonaan. Halkan waxay kula kulmi hawl wadeenno kalsooni leh och caqli badan oo ka tirsan hawlqabad ka duulaya in qof waliba xaq u leeyahay inuu qayb ku lahaado go'amada.

Annaga waa wax noo cad in carruurta oo dhan lagu qaabilo ixtiraam, lana siiyo ahmiyad- isla markaana la haysto xallad. Urur carruureed ahaan waanu ku baraarugsannahay in wax qiimaynta ay carruurta qaadanayaan ay macno weyn u leedahay sida ay ula dhaqmayaan dadka kale iyo sida ay noqonayaan marka ay waynaadaan.

Hawlqabadka

Junis waxay samaysaa hawlqabd ballaaran, deegaan ahaan iyo nuxur ahaan ba. Mararka qaarkood gacmaha ayaannu wax ku aburnaa ama jirka oo dhan ayaannu u adeegsannaa jaas iyo ciyaar. Waxanu jilnaa riwaayad, waxanu abaabulnaa dhiskoo, filimo noo gaar ah ayaannu samaynaa, waxanu ku dhaxnaa meelo iyo waxyaalo kale oo badan.



Su'aalo muhiim ah

Waxanu la wadaagnaa mabaadi' isku mid ah dhaqdhaqaaqyada kale ee IOGT-NTO. Taas macneheedu waaa in hoggaamiyeyaashayada laftoodu ay qaateen oo raacayaan aragti ku dhisan dimoqoraaddiyad, isgargaar iyo balwad la'aan.

Hawlqabadka Junis wuxu ku dhisanyahay fikradda ah xuquuqda isku midka ah ee dadkoo dhan iyo ixtiraamka dabeecadda iyo dadka labadaba, meel kasta oo adduunka laga joogo iyo xaalad kasta oo lagu suganyahay.



Hoggaamiyaha Junis Junisledare

Junis ahaan waanu ku hanweynnahay hoggaamiyeyaas-hayada. waxanu ku leennahay waddanka oo dhan qiyaastii 1300 hoggaamiye oo tabarruc ah oo wax walba ka horraysi-inaya carruurta dantooda. Qofkii ka weyn 15 jir wuu u noqon karaa Junis hoggaamiye, waxanu heli doonaa waxbarasho aasaasi ah oo muhiim ah ka dib, in uu saxeexo edaabta hoggaamiyaha ee Junis. Hoggaamiyuhu wuxu xubin ka yahay isbahaysiyada dhaqdhaqaaqyada IOGT-NTO midkood, sidoo kalena wuxu hoggaamiyenimadiisa xubin kaga noqonayaan Junis. Wax dheeraad ah ka sii akhri www.junis.org/bliledare

In aad hoggaamiye ka noqoto Junis waa waxyaalaha ugu xiisaha badan ee jira! Waa wax aad u wacan in carruurta loola shaqeeyo si tabarruc ah.



Ujeedooyinka Junis

Dhammaan carruurta waxay dareemi soo dhaweyn, xallad, iyo inay ku horumaraan Junis. Hawlqabadku waa bay'ad xasilloon oo qaadi karta ciyaar iyo hawlo muhiim ah oo lala wadaago asxaabta cusub iyo kuwii horeba. Khidmadda xubinnimada ee raqiiska ah ayaannu suurtoagal ugaga dhi-gayntaa carruurta dhammaantood inay soo galaan Junis, dhaqaalaha qoysku sida uu doono ha ahaadee.

Hadafku waa in kor loo qaado isku kalsoonida carruurta iyo fahankooda dadka kale. Ujeedada fog ee Junis waa in carruurta wixii ay bartaan ee ku saabsan daroogo la'aanta, ilaalinta dimoqoraaddiyadda, ka shaqaynta isgargaarka caalamiga ah iyo bay'ada ay u qaataan dhinaca la xiriirka bina aadanka iyo dabecaddaba.

Carruur badani waxay baahi u qabaan taageero dheeraad ah, taageerada qaarkood waa in dad xirfad u leh ay mas'uul ka noqdaan. Junis waxay xoog dheeraad ah saaraysaa carruurta "aan muuqan" ee ku dhex korta qoysaska balwadda leh. Sidaa darteed waxannu sannad walba soo saarnaa raboodh ku saabsan taageerada ay degmooyinka Iswiidhan siiyaan carruurtaas.

Wax dheeraad ah ka sii akhri: www.junis.org/rapport

Junis waa wax intaas ka badan ...

Galkan waxa ku jira warbixin kooban oo ku saabsan kuwa aannu nahay ee ka tirsan Junis, waxa aannu aaminsannahay iyo waxa aannu qabanno. Dabcan waa soo koobid uun oo aan si caddaalad ah uga wada waxbixinayn wax kasta oo ku saabsan shaqadayada horumarineed iyo ururadeenna 200 ee urur ah ee dalka dhan ka jira. Fadlan ka sii ogow ciyaaraha kala duwan, talooyinka hawlqabadyada iyo xogta carruurta, hoggaamiyeyaasha iyo dadka waaweyn ee kale boggayaga internetka ee www.junis.org

Adiga laftaadu haddii aad rabto in aad qayb ka noqoto hawsha adduunka ugu xiisaha badan ee ugu muhiimsan- in tusaale loo noqdo carruurta- waa in aad nala soo xiriirto!



IOGT-NTOs Juniorförbund

Box 128 25, 112 97 Stockholm

info@junis.org

08-672 60 70